



OREGON WAXAY QAADANAYSAA MAWQIF LAGAGA SOO HORJEEDO NACAYBKA IYO EEXDA.

Gobolkeena iyo sharciyadeenu waxay u taagan yihiin ka mid noqosho, aqbalid iyo ilbaxnimo. Ka soo horjeedaan eexda iyo nacaybka, nacaybka jinsi gaar ah 'homophobia', iyo nacaybka dadka ka yimid wadamada kale 'xenophobia'. Ka soo horjeedaan rabshada iyo cabsi gelinta nooc kasta leh.

Waxaanu si wadajir ah u qaadanaynaa mawqif. Si hab wanaagsan loola socdo xogta iyo siyaabo cusub oo lagu wadaago waxa aan ka baranay. Taageero dheeraad ah oo loogu talagalay dadka dhibaataada ka badbaaday. Iyo ilo dheeraad ah oo loogu talagalay ciidamada dhaqangelinta sharciga. Si aanu u sameyn karno isbeddel dhab ah.

Waa mawqifka mustaqbalkeena. Si markaa qofna uusan u noqon dhibbanaha dembi nacayb ku dhisan. Iyada oo aan la eegayn **dabaqadooda la dhowrayo: jinsiyada, midabka, aqoonsiga jinsi ahaaneed, dookha galmo, naafanimada ama dalka laga soo jeedo.** Oo qof kastaa u yahay mid ammaan ah, la soo dhaweynayo, oo uu xor u yahay in uu noqdo cidda uu yahay.

Maxaa yeelay dhammaanteen waxaanu nahay reer Oregon. Iyada oo qaadashada mawqif uu yahay waxa aanu sameyno.

NALA HADAL

Ha noqoto mid ku dhacday adiga ama qof kale, waxaanu gacan ka geysan karnaa la socodka dhammaan nacaybka iyo dhacdooyinka eexda.


Khadka Aan Ahayn Xaalada Degdega ah
1-844-924-BIAS (2427)

Hawl wadeeno-lagu wergaliyay dhibaatooyinka naxdinta leh ayaa diyaar ah Isniinta ilaa Jimcaha, 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo
Waan aqbalnaa wicitaanada Wudbinta oo dhan Turjumaad ku qoran 240+ luqaddood

Ama waxaad wakhti kasta noogu soo sheegi kartaa dhanka internet-ka:

STAND AGAINST HATE

.OREGON.GOV



Oregon waxay
qaadanaysaa

MAWQIF LAGAGA SOO HORJEEDO NACAYBKA

Waxaad u baahan tahay
in aad wax ka ogaato
Sharciyada Dembiyada
Nacaybka Ku Dhisan
iyo Dhacdooyinka
Eexda ee Oregon.



Oregon Dept. of Justice's
Civil Rights Unit
1162 Court St. NE
Salem, OR 97301
503-378-6324
Somali Edition



NACAYBKU WAA MID SII KORDHAYAA. Kaliya maaha Oregon, ee balse dalka oo dhan, waxaa jiray korodhka dembiyada nacaybka ku dhisan iyo dhacdooyinka eexda. WAA INAY JOOGSATAA.

SHARCIYADA OREGON:

Sanadkii 2019, Oregon ayaa cusbooneysiisay sharciyadeeda dembiga nacaybka ku dhisan si loo ballaariyo ilaalinta oo loo wanaajiyo wax soo sheegida si qof kasta oo ku nool Oregon ammaan ugu dareemi karo bulshadiisa.

WAA MAXAY DEMBIGA EEXDU?

Oregon dhexdeeda, magaca sharci ah ee dembiga nacaybka ku dhisan waa **Dembiga Eexda**. Waa mid sharci darro ah in:

- Loo hanjabo qof, qoysiiska, ama hantidiisa
- Wax laga beddelo, la farageliyo, ama waxyeello loo geysto hanti
- La weeraro qof ama gacanta la saaro qof
- Qof loo adeegsado hub

Iyada oo ku saleysan dhiirigelinta ka dhanka ah qof dabaqadiisa dhabta ah ama loo arko in la dhowro.

DEMBI + DHIIRIGELIN KU SALEYSAN EEX = DEMBI NACAYB KU DHISAN

DHACDOOYINKA EEXDA: MAXAY YIHIIN?

Oregon dhexdeeda, **Dhacdada Eexda** waxaa lagu qeexaa in ay tahay muujinta colaadeed ee kasta ee ay dhici karto in ay dhiirigeliso qof kale jinsigiisa dhabta ah ama sida loo arko **midabkiisa, naafanimadiisa, diintiisa, dalka uu ka soo jeedo, dookhiisa galmo ama aqoonsigiisa jinsi ahaaneed**. Waxay noqon kartaa mid dhanka afka, jireed, ama muuqaal.

Tusaalooyinka dhacdooyinka eexda inta badan dhaca waxay kala yihiin:

- ❖ Adeegsiga hadalada cayda ah ee cunsurinimo, qowmiyaddeed, ku dhisan nacaybka jinsi gaar ah 'homophobic', ama necbaanshaha dadka jinsiga beddeshay 'transphobic'
- ❖ Ku hadaaqida hadal nacayb leh
- ❖ Ku jeesjeeska qof qaba naafanimo jireed ama maskaxeed
- ❖ Kaftanka "jokes" aflagaadada leh
- ❖ In qof loo sheego in uusan lahayn dalkani

Iyada oo dhacdooyinka eexdu aysan ahayn dembiyo, waxay noqon karaan ku xadgudubka xuquuqda madaniga ah waana in la soo sheegaa.

SOO SHEEG DHACDO

Oregon gobolka oo dhan, Khadka Ka Jawaabida Eexdu ee qarsoodiga ahi wuxuu fududeeyaa soo sheegida dhammaan nacaybka iyo eexda, ha noqoto mid ku dhacday adiga ama qof kale.



Khadkeena aan ahayn xaalada degdega ah ka wac **1-844-924-BIAS (2427)** si aad ula hadasho qofka wax u dooda-oo lagu wergaliyay dhibaatooyinka naxdinta leh.

Isniinta- Jimcaha 9 subaxnimo-5 galabnimo Saacadaha shaqada ka dib, farriimaha waa la soo celin doonaa

Waan aqbalnaa wicitaanada Guddinta oo dhan Turjumaad ku qoran 240+ luqaddood



Booqo StandAgainstHate.Oregon.gov si aad wax u soo sheegto wakhti kasta.

SOO SHEEGIDA NACAYB: MAXAY TAHAY SABABTA LOO SAMEYNAVO?

Soo sheegida dembiyada nacaybka ku dhisan iyo dhacdooyinka eexdu waxay gacan ka geystaan abuurista meel ammaan ah oo qof kasta leeyahay.

Khadka Ka Jawaabida Eexda waxaa loogu talagalay:

- Dadka dhibaataada ka badbaaday
- U soo guddinta dadka dhibaataada ka badbaaday ee adeegyo caawin kara
- La socodka xogta

